



# Sidee Ayaa Shaqadu Saameyn Ugu Yeeleneysa Macaashka

## Miiska ku jira

Intee ayaad dakhligaagu noqon karaa adiga oo weli qaadanaya macaashka?	2
Dakhligaaga iyo macaashka – imisa ayaa lagu siinayaa?	2
Dakhligee ayaa la xisaabaa... goorma ayaanu xisaabeynaa?	2
Sharciyada gaarka ee sanadka ugu horeeyaa hawlgabka	3
Miyaad soo sheegeysaa isbedel ku yimaada dakhligaaga?	3
Macaashka aad qaadato aad ma u kordhayaa kolka dambe haddii lagaa gooyo macaashka shaqada darteed?	4
Ma jiraan habab kale oo shqadu ay u kordhineyo macaashkaaga?	4
La Xiriirka Lambarka Bulshada	4

Waad qaadan kartaa macaashka Lambarka Bulshada ama macaashka dadka leh dhaxalka welina waad sii shaqeyn kartaa. Laakiin, haddii aad ka yar tahay da'da hawlgabka ama dakhliga ku soo galo ka badan yahay xadka loo gooyey, macaashkaaga hoos ayuu u dhacayaa. Macaashka lagu siinayo wuu yaraanayaa, hase yeeshay, dhab ahaantii lama wada goynayo. Macaashkaagu wuu kordhayaa marka aad gaarto da'da hawlgabka buuxa si loogu xisaabo macaashkii lagaa jaray dakhligii horey kuu soo galay. (Xaaska/sayga iyo dadka leh dhaxalka ee qaata macaashka sababtoo ah waxa ay koriyan ilmo aanw eli qaangaarin ama naafu lama siinayo macaash dheeraad ah marka ay gaaraan da'da hawlgabka haddii macaashka ay qaadanayeen ku saleysnaa shaqada.)

**FIIRO GAAR AH:** Sharciyo kala duwan ayaa loo adeegsadaa haddii aad qaadato macaashka Lambarka Bulshada ee dadka naafada ah ama Macaashka kabitaanka dakhliga. Waa in Lambarka Bulshada soo gaarsiisaa dhamnaan dakhliga ku soo gala. Sidoo kale sharciyo gaara ah ayaa loo adeegsadaa dakhliga ku soo gala haddii aad ka shaqeyso meelo ka baxsan Mareykanka. Nala soo xiriir haddii aad ka shaqeyneyso (ama aad qorsheyneyso in aad ka shaqeyso) meel ka baxsan waddanka.

Intee ayaad dakhligaagu noqon karaa adiga oo weli qaadanaya macaashka?

**Hadii aad dhalatay 2da Janaayo 1956 kii ilaa 1da janaayo 1957**, ka dib marka aad gaarto da'da hawlgabka buuxa ee 66 sano. *Haddii*

*aad shaqeyso oo aad gaartay da'da hawlgabka buuxa ama ka weyn, macaashkaaga oo dhan waad heysan kartaa, iyada oo aan la eegin dakhliga ku soo galay.* Haddii aad ka yar tahay da'da hawlgabka buuxa, waxaa jira xad u go'an dakhli ku soo geli kara welina aad macaashka qaadan karto.

**Haddii aad ka yar tahay da'da hawlgabka buuxa sanadka 2018** waa in aan \$1 ee macaash ee aad qaadataba u jarnaa \$2 oo dakhliga ku soo gala ah wixii ka sareeya \$17040. Haddii aad gaartay da'da hawlgabka buuxa inta lagu jiro 2018, waa in \$1 oo macaasha ahba aan u jarnaa \$3 oo dakhliga ku soo gala ah wixii ka sareeya \$45,360 ilaa laga gaaro bisha aad gaarto hawlgabka buuxa.

### **Tusaalayaasha soo socda ayaa muujinaya sharciyada saameynta kugu yeelan kara:**

Ka soo qaad in aad codsatay macaashka Lambarka Bulshada adiga 62 jir ah Janaayo 2018 macaashkaaguna wuxuu noqonaya \$600 bishii (\$7,200 sanadkii). Haddii aad qorsheyneyso in aad shaqeyso sanadka 2018 ka oo dakhliga gaaraya \$22,000 ku soo gala (wax ka sareeya \$4,960 ee acagta xadka au ah ee \$17,040). Wawaab kaa jareynaa \$2,480oo macaashka Lambarkaaga Bulshada (\$1 ayaan u jareynaa \$2 ee aad ka sareyo dakhliga kuu go'an). Si taas loo xisaabo, waxaan joojineynaa macaashkii aad qaadan laheyd Janaanyo 2018 - Maajo 2018. Laga bilaabo Juun 2017, wawaab aad qaadaneysaa \$600 oo macaash ah waana ay kuu soconeysaa ilaa dhamaadka sanadka. Sanadka 2018, waxaan ku siineynaa \$520 oo ah lacagta lagaa jaray bishii Maajo 2018.

Ama, haddii aan si kale u dhahno ma aadan gaarin da'da hawlgabka buuxa bilowga sanadka, laakiin wawaab aad gaareysaa da'daas bisha Nofeembar ee 2018. Dakhliga ku soo galay wawaab uu noqday \$46,380 mudada 10ka bilood ah ah tobanka bilood ee u dhaxeysa Janaayo ilaa Oktoobar. Inta lagu jiro mudadaas, wawaab aan kaa jareynaa \$500 (\$1 oo loo jaro \$3 ee dakhligaagu ka sareeyo xadka \$45,360) Si sidaa loo sameeyo, wawaab aan heynynaa

jeegga ugu horeeya ee sanadka. Laga bilaabo Juun 2018, wawaab aad qaadaneysaa \$600 oo macaash ah waana ay kuu soconeysaa ilaa dhamaadka sanadka. Sanadka 2019, waxaan ku siineynaa \$260 oo ah lacagta lagaa jaray bishii Janaayo 2018.

### **Dakhligaaga iyo macaashka – imisa ayaa lagu siinaya?**

Jadwalka hoose waxa uu fikrad kaa siinaya imisa ayuu noqonaya macaashka aad qaadaneysa 2017 ee taasoo ku saleysan qyaasta macaashka bil kasta iyo dakhliga ku soo gala.

#### **Dadka da'doodu ka yar tahay xilliga hawlgabka buuxa sanadka oo dhan**

<i>Haddii macaashka Lambarka Bulshada ee bil kasta uu yahay</i>	<i>Dakhligaaguna yahay</i>	<i>Macaashka sanadka lagu siinayo waa</i>
\$700	\$17,040 ama ka yar	\$8,400
\$700	\$18,000	\$7,920
\$700	\$20,000	\$6,920
\$900	\$17,040 ama ka yar	\$10,800
\$900	\$18,000	\$10,320
\$900	\$20,000	\$9,320
\$1,100	\$17,040 ama ka yar	\$13,200
\$1,100	\$18,000	\$12,720
\$1,100	\$20,000	\$11,720

### **Dakhligee ayaa la xisaabaa... goorma ayaanu xisaabeynaa?**

Haddii aad cid kale u shaqeyso, musharkaaga oo kaliya ayaa la xisaabayaa marka la eego xadka u degsan Lambarka Bulshada. Haddii aad iskaa u shaqeyso, waxaan xisaabeynaa dakhliga saafiga ah ee kaa soo gala ganacsigaaga. Dakhli ahaan uma xisaabno macaashka ay dawladda ku siiso, dakhli kaa soo gala maalgelinta, dulsaarka, hawlgabka

shaqada, dulsarka kuu urura iyo macaashka raasul maalka. Hase yeeshi, waan xisaabeyna lacagta ay shaqaaluhu ku daraan hawlgabka ama qorshaha hawlgabka ee ku jira mushaharka inta aan laga jarin canshuurta.

Haddii aad mushahar ku shaqeysyo, dakhliga waxaa la xisaabayaa marka aad shaqyesay (kasbato), ee ma aha marka lagu siiyey. Haddii uu jiro dakhli aad shaqyesay sanadkii hore, laakiin lacagiisa lagu siiyey sanadka xiga, waa in loo xisaabaa sida dakhli sanadkii hore. Tusaale wanaagsan waxaa noqon kara fasaxa caafimaadka iyo kan sanadka iyo gunada ururtay ee lagu siiyo.

Haddii aad iskaa u shaqeysato, dakhliga waxaa la xisaabayaa marka uu ku soo galo — marka laga reebo haddii lacagta lagu siiyosanad ka dib marka aad xaqaa u yeelatay Lambarka Bulshada oo aad lacagta shaqeysay ka hor intii aadan xaqaa u yeelan.

## Sharciyada gaarka ee sanadka ugu horeeya hawlgabka

Mararka qaarkood dadaka hawlgabka noqda bartamaha sanadka waxa ay qaateen wax ka badan dakhligii loo gooyey sanadka oo dhan. taas weeye sababta ay u jiraan xeerar gaar ah oo loo adeegsado dakhliga sanadka, inta badan sanadka ugu horeeya ee hawlgabka. Sida uu dhigayo sharcigan, waxa aad qaadan kartaa jeega Lambarka Bulshada oo aan wax laga jarin, iyada oo aan loo eegin dakhliga sanadka oo dhan.

Sanadka 2018ka, qof hawlgalka buuxa ah sanadka oo dhan waxa loo tixgeliyaa hawlgab haddii dakhligiisu yahay \$1,420 ama ka yar.

Tusaale ahaan, Joh Smith hadii uu ku noqdo hawlgab da'da 62 30ka Oktoobar 2018. Dakhligisu waxa uu noqonayaa \$45,000 ilaa Oktoobar. Haddii uu helo shaqo waqtiga dhiman oo uu bilaabo Nofeembar waxa uu dakhligiisu noqnayaa \$500 bishii. Inkasta oo dakhliga soo galay uu si la taaban karo ee 2018ka uga sara marayo xadka u go'an ee loo gol yahay (\$17,040), waxa la siinayaa macashka

Lambarka Bulshada bisha Nofeembar iyo Diseembar. Tani waxa ay ku dhacday isaga oo bilahaas uu dakhligiisu ahaa \$1,420 ama ka yar, xadka dakhliga ee u go'an dadka gaara da'da hawlagbak buuxa. Haddii dakhliga soo gala Mr. Smith uu ka bato \$1,420 mid ka mid ah bilahaas (Nofeembar iyo Diseembar), ma helayo macaash bilahaas. Laga bilaabo 2019, sharciga u degsan ee xadka sanadka ayaa lagu qaadayaa (dhaqayaa).

Sidoo kale haddii aad iskaa u shaqeysato, waxa aan tixgelineynaa inta ay le'eg tahay hawsha ay ganacsigaaga ka qabato si aan u ogaano inaad hawlgab tahay iyo in kale. Mid ka mid ah sida loo fiiryo waa in aan eegno mudada aad ka shaqeysyo ganacsiga. Guud ahaan, haddii aad ka shaqeysyo ganacsigaaga in ka badan 45 saacadood bishii, ma tihid hawlgab; haddii aad ka shaqeysyo ganacsigaaga wax ka yar 15 saacadood waxa aad tahay hawlgab. haddii aad ganacsigaaga ka shaqeyso inta u dhaxeysa 15 ilaa 45 saacadood bishii laguma tixgelinayo in aad tahay ahwlgab haddii ay shaqadu tahay mid u baahan xirfad gaar ah ama aad maareyneysyo ganaci heer dhexe ah.

## Miyaad soo sheegeysaa isbedel ku yimaada dakhligaaga?

Waxaanu wax ka bedeleynaa macaashka aad qaadato Lambarkaaga Bulshada ee 2018 taasoo ku saleysan waxyaabaha aad nooga sheegto dakhliga ku soo gala 2018. Haddii aad u maleyneysyo in dakhliga ku soo gala 2018 uu ka duwan yahay wixii aad noo dheegtay markii hore, durbadiiba noo soo sheeg.

Haddii uu xubno kale oo qoyska ka tirsan qoyska ay qaataan macaash ku saleysan shaqada, dakhliga ku soo gala ka dib marka aad qaadato macaashka hawlgabka waxa ay hoos u dhigeysaa macaashka ay qaadanayaan sidoo kale. Hase yeeshi, haddii xaaskaaga/seygaaga iyo caruurtaada ay qaataan macaashka sida xubnaha qoyska, dakhliga soo gala waxa uu saameyn ku yeelanayaa macaashka ay qaataan iyaga oo kaliya.

Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo dakhliga ku soo gala, nala soo xiriir. Marka aad nala soo xiriireyso horey u soo qaado Lambarkaaga Bulshada.

## Macaashka aad qaadato aad ma u kordhayaa kolka dambe haddii lagaa gooyo macaashka shaqada darteed?

Haa Haddii qeyb ka mid ah macaashkaaga lagaa gooyo dakhliga ku soo gala dartiis, macaashka aad qaadaneyso waa kordhayaa xilliga aad gaarto hawlgabka buuxa iyada oo la tixgelinayo bilaha macaashka lagaa gooyey.

Tusaale ahaan, ka soo qaad in aad codsatay macaashka hawlgabka markii aad gaartay 62 sanadkii 2018 iyo macaadhka la siinayana waa \$953 bishiiba. Intaa ka dib, waxa aad ku noqotay shaqada iyo 12 bilood oo macaashka lgaa goynayo.

Waxa aan dib u xisaabeynaa macaashkaaga marka ay da'daadu gaarto da'da hawlgabka buuxa ee 66 iyo 4 bilood taasoo lagu siinayo \$1018 bishii (lacagta doolarka ee maanta). Ama, ama uu dakhli badan ku soo galayo inta u dhaxeys 62 ilaa 66 sano iyo 4 bilood iyada oo macaashka lagu siin lahaa oo dhan lagaa heynayo. Marka ay sidaa tahay, waxa aan bishiiba ku siineynaa \$1,300 bishii laga bilaabo da'da 66 sano iyo 4 bilood.

## Ma jiraan habab kale oo shqadu ay u kordhineyso macaashkaaga?

Haa Sanad kasta waxa aan dib u eegnaa diiwaanka dhamaan dadka qaata macaashka ee qaata hawlgabka. Haddii dakhligii u dambeeyey ee ku soo galay sanidihii ugu dambeeyey uu noqdo kan kuugu badan, waxaanu xisaabnaa macaashkaaga taasoo kordhineysa macaashka lagu siinayo. Nidaamkaas waa mid si toos ah u dhaca macaashkana waxaa la bixiyaa bisha Diseembar ee sanadka soo socda. Tusaale ahaan, Diseembar 2018 waxaa lagu

siinayaa korodhka dakhliga 2017 haddii ay taasi kordhineyso macaashkaaga. Korodhkaas waxaa dib looga soo bilaabayaa bishii Janaayo 2018.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

## Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda [www.socialsecurity.gov](http://www.socialsecurity.gov). Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security xisaab* oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqijintaa macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (*Extra Help*) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqlu ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Wuxaanu idii heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan

tiiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waa  
aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na  
soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska  
Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta  
adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku  
heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka.  
Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta  
ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY,  
**1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay  
ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho,  
waxa aan telefoonka ka jawaabnaa  
inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da  
fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku  
weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan  
mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiiin  
ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu  
rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today  
and tomorrow

**Social Security Administration**  
Publication No. 05-10069-SO | January 2018  
Sidee Ayaa Shaqadu Saameyn Ugu Yeelenleysaa Macaashka  
How Work Affects Your Benefits (Somali)  
Produced and published at U.S. taxpayer expense  
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha